

Fasaxa jiilaalka/qaboobaha ayaa loo dhereeyey ardayda K-12

Disember 30, 2021

Si loo taageero ku laabashada guusha leh ee dugsiya iyo fidinta wakhti qorshayn dheeraad ah, fasalka xannaanada dhallaanka ilaa Fasalka 12 fasaxa jiilaalka/qaboobaha waxa la kordhin doonaa gobolka oo dhan ilaa Janaayo 10.

Fasaxa la dhereeyey wuxuu siin doonaa maamulka dugsiya wakhti ay ku ururiyaan xog dheeraad ah si ay u qiimeeyaan saamaynta shaqaalaynta iyo saamaynta hawleed ee suurtagalka ah ee xaaladda COVID-19 ee hadda jirta.

Si looga caawiyo ku soo laabashada nabdoon ee fasallada, Kooxda Hawl-galka PPE ee Hay'adda Caafimaadka Alberta iyo Arrimaha Dawladda Hoose waxay sidoo kale gaarsiin doonaan 8.6 milyan oo baaris degdeg ah iyo 16.5 milyan waji-xirka dugsiyada, laga bilaabo asbuuca Janaayo 10-keeda.

Si loo sii taageero ardayda dugsiya sare ee waxbarashadoodii ay carqaladaysay kordhintan, imtixaanada dibloomada ee Janaayo dhici lahaa waa la joojiyay. Go'aan ayaa la gaari doonaa mar kale 2022 ee ku saabsan imtixaanada diblooma ee dhici lahaa bilaha Abril iyo Juunyo.

Iyada oo xaaladda COVID ay si degdeg ah u kordheyso, sidoo kale waa in aan si la mid ah uga jawaabno. Joojintaan waxay siin doontaa macalimiinta, maamulka dugsiya iyo maamulka dugsiya wakhti dheeraad ah si ay u qorsheeyaan ardaydu inay si nabad ah ugu soo laabtaan waxbarashada. Marka ay jiraan duruufahan adag, waxaan aad ugu mahadcelinayaa waalidiinta, ardayda, macalimiinta iyo la-hawlgalayaasha waxbarashada dabacsanaantooda inta lagu jiro aafada."

Adriana LaGrange, Wasiirka Waxbarashada

Maamulka dugsiya waxa ay u isticmaali doonaan fasaxa jiilaalka/qaboobaha ee la dhereeyey si ay ugu diyaar garoobaan xaaladaha waxbarasho ee iskuulka sida tooska ah loo tagayo iyo midda gurigaba, sidii ay horeba u samayn jireen intii lagu jiray aafada. Macluumaad iyo hagitaan lagu taageerayo maamulka dugsiya iyo waalidiinta ayaa laga heli karaa alberta.ca/returntoschool.

Isbeddelkan, waxaan ka jawaabaynaa welwelka ka imaanaya daneeyayaasha waxbarashada iyo in Alberta la jaanqaado gobollada kale ee Canada. Joojinta waxay sidoo kale ka caawin doontaa maamulka dugsiga inay qorsheeyaan isbeddelada imtixaanka iyo ogeysiinta xiriirka.

Qaybinta baaritaanka degdega ah waxay bixin doontaa baaritaan degdeg ah oo ku filan si loo siiyo laba qalab oo shan-baaris ah arday kasta iyo xubin kasta oo ka mid ah shaqaalaha nidaamka waxbarashada oo dhan. Qaybintii ayaa lasoo gebagebaynayaa, xog dheeraad ahna waa la idinla qaybsan doonaa toddobaadka soo socda.

Af/San xirka heerka-caafimaadka ah ayaa sidoo kale loo qaybin doonaa dugsiyada ardayda iyo shaqaalaha dugsiga iyada oo loo marayo hab habaysan. Marka si buuxda loo qaybiyo, shaqaalaha iyo ardaydu waxay heli doonaan sahay siddeed asbuuc ah. Qaybinta af/san xirka darajooyinka caafimaadka ee carruurta iyo dadka qaangaarka ah labadaba waxaa la isku dubbaridi doonaa hab qorsheysan iyada oo loo sii marinayo Kooxda Hawl-galka ee Arrimaha Dawladda Hoose ee PPE iyada oo macluumaad dheeraad ah ayaa sidoo kale la wadaagi doonaa toddobaadka soo socda.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tillaabooyinka soo socda ee la xiriira in ardaydu ay wax ku baran doonaan fasalka ama guriga laga bilaabo Janaayo 10 waxa la ogeysiin doonaa dabayaaqada asbuuca soo socda. Go'aanku wuxuu noqon doonaa mid caddayn salka ku haya iyadoo la adeegsanayo macluumaadka hawlgelinta ee ay bixiyaan maamulka dugsiga, macluumaadka kiiska iyo xogta kale ee caafimaadka ee la heli karo.

Xogta la xiriirta

- [Badbaadada iyo caafimaadka ku sugnaada sanad dugsiyeedkan](#)

Warbaahinta

- [Daawo shirka jaraa'id](#)
- [Dhageyso shirka jaraa'id](#) (la heli karo dhacdada ka dib)

Weydiimaha warbaahinta

[Nicole Sparrow](#)

780-720-1915

Xoghayaha Warfaafinta, Waxbarashada